

### **Isbedelka cusub ee wakiiladda boostadda**

Boostadda waxay leedahay wakiilo waddanka oo dhan ka shaqeeya wakiiladdas oo ugu dhawaanna gaaraya 1600 ee wakiilo boosto, halkaaso macaamishayaddu ka diri karaan kana soo qaadan karaan bakaddahooda, kana gadan karaan farankaboollo ama ka fushan karaan howlahooda kale ee boostadda.

Boostaddu waxay la shaqeysaa wakiilo adeeg fiican siinaya macaamiisha marka loo eego meesha ay ku yaalan iyo waqtiyadda dheer oo ay furan yihiin. Wakiiladda boostadda oo baddana furan 10 saacadood maalin ee toddobadda maalmood ee todobaad walba. Taaso ka dhigaysa adeega boostadda ee Swiidhenadeega iyo wakhtiyadda fiican ee ay furan yihiin kan ugu haboon ee qaaraddan Yurub.

Boostaddu waxay kordhineysa wadda shaqeynta wakiiladda kuna kordhinaysa wakiillo cusub oo ay ka mid yihiin ICA, Coop iyo Axfood. Saddexdaaso dhami waxay waddanka ku leeyihiindukaamo lagu gado raashin maalmeedka. Dukaamaddaso caan ka ah waddanka oo dhan lagana heli karo magaalo walba. Hamiyaddayadu waa in aan u fududeyno, si wacan wax ugu qabano, si fiicana u qeexo howsha aan qabano macaamiishayadda. Haddii baahidu korodhana waxaan mustaqbalka ku talo jirnaa in aan wadda shaqeyn la yeelano dukamadda yar yar si aan adeeg wacan u siino macamiishenna. Aragtidayadduna waa in uu jiraa wakiil boosto meel walba oo dadku ku kulmaan oo khaas ahaan ay cunno maalmeedka ka iibsaddan.

Haddii ay dhacdo in aad yeelato wakiil cusub waxaan boostadda kuugu soo dirayna kaadh cinwaankiisu ku qoran yahay "Din brev- och paketservice flyttar" "Warqaddada iyo adeegg baakadeddu waa guuray". Kaadhkana waxaa ku qoran waqtiga wakiilkaaga boostadda la furayo iyo cinwaanka meesha uu ku yaalo iyo waqtiyadda uu furan yahay wakiilkaaga boostadda.

Warbixinta wakiiladda boostadda waxaad ka heli cinwaankaan hoostisa "Här finns Posten" "Halkaan baad ka heli Boostadda" kadibna dooro "postombud" "wakiilka boostadda".